Shuruudaha Tallaallada Dugsiga



Maxay u jiraan Shuruudaha Tallaallada Dugsiga?

Cudurrada tallaalladu ka hortagaan waxay si dhakhso ah ugu faafi karaan dugsiyada iyo goobaha xannaanada carruurta. Sababtaas awgeed, qaar ka mid ah tallaallada ku jira jadwalka tallaallada carruurta ayaa looga baahan yahay carruurta si ay u dhigtaan dugsiga. Shuruudaha tallaallada dugsiyada waxay jireen in ka badan 175 sano. Shuruuddii ugu horreysay ee tallaalka dugsiyada waxaa la sameeyay sannadkii 1855, markaas oo gobolka Massachusetts uu carruurta uga baahday tallaalka furuqa si ay dugsiga u galaan. Sannadkii 1980, dhammaan gobollada Mareykanka waxay lahaayeen shuruudo tallaal. Shuruudahani waxay ku guuleysteen inay yareeyaan dillaaca cudurrada. Waxay gacan ka geystaan ka hortagga faafitaanka cudurrada, waxayna ilaaliyaan badbaadada ardayda iyo shaqaalaha dugsiga. Marka aan carruurteenna tallaalno, waxaan u suurtagelinaynaa inay wax ku bartaan kuna koraan deegaan caafimaad qaba.

Waa kuwee tallaallada looga baahan yahay Colorado?

Waxyaabaha Looga baahan yahay Dugsiga (K-12)

- Cudurka beerka ee nooca B (HepB)
- Diphtheria, teetanada, iyo qufac-dheer (DTaP)*
- Fayraska dabaysha (polio) ee la dilay (IPV)*
- Jadeecada, bararka qanjirada (mumps), iyo rubella (MMR)*
- Busbuska (chickenpox)*
- Teetanada, diphtheria, iyo qufac-dheer (Tdap)**

*Ardayda da'doodu u dhaxayso 4 ilaa 6 sano waxaa looga baahan yahay inay qaataan kuuradooda ugu dambeeya ee DTaP, IPV, MMR iyo busbuska ka hor inta aysan gelin xannaanada dugsiga.
**Sannad-dugsiyeedka hadda ee 2025–2026, ardayda waxaa looga baahan yahay inay qaataan hal kuuro oo tallaalka Tdap ah ka hor inta aysan gelin fasalka 6-aad. Hal kuuro oo tallaalka Tdap ah ayaa looga baahan yahay ardayda fasallada lixaad ilaa 12-aad

Waxyaabaha looga baahan yahay Xannaanada Carruurta

- Cagaarshowga nooca B (HepB)
- Difteri, teetanus, iyo qufac-dheer (DTaP)*
- Haemophilus influenza nooca b (Hib)
- Fayraska dabaysha ee la dilay (IPV)*
- Tallaalka bakteeriyada sambab-bararka (PCV)
- Jadeecada, bararka qanjirada dhabanka, iyo rubella (MMR)*
- Busbuska (Varicella)*

*Ardayda da'doodu u dhaxayso 4 ilaa 6 sano waxaa looga baahan yahay inay qaataan kuuradooda ugu dambeeya ee DTaP, IPV, MMR iyo busbuska ka hor inta aysan gelin xannaanada dugsiga.

Wax badan ka ogow shuruudahan:
cdphe.colorado.gov/immunization/requirements-for-school-entry

Xaggee ayaan Ilmahayga tallaal uga heli karaa?

Waxaad tallaallada ka heli kartaa bixiyeyaasha adeegga caafimaadka ee ku kala yaalla Colorado, haddii aad caymis caafimaad leedahay iyo haddii aadan lahaynba. Qorshayaasha caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay waxaa looga baahan yahay inay daboolaan kharashka tallaallada. Carruurta aan lahayn caymis caafimaad ama caymiskoodu aanu daboolin kharashka tallaallada waxay tallaallada ku heli karaan bilaash iyada oo loo marayo barnaamijka Tallaallada Carruurta.

Ka raadi tallaallada: cdphe.colorado.gov/immunizations/get-vaccinated

Sideen ku heli karaa diiwaanka tallaallada ilmahayga?

Waxaad ka heli kartaa diiwaanka tallaallada ilmahaaga mareegta waaxda caafimaadka ee gobolka.

cdphe.colorado.gov/immunization/copy-of-records

Maxay Muhiim u Yihiin Heerarka Tallaalka ee Sare?

Waalidiinta iyo dadka daryeela carruurta waxay tixgeliyaan arrimo badan marka ay go'aansanayaan dugsiga ama xannaanada carruurta ay ilmahooda u dirayaan, waxaana ka mid ah heerarka tallaalka. Heerarka sare waxay ka dhigan yihiin in:

1. Ardayda iyo shaqaalaha ayaa si wanaagsan looga ilaaliyaa faafitaanka cudurrada. Marka dad ku filan oo bulshada ka tirsan la tallaalo, waxay ilaaliyaan dadka kale – arrintan waxaa loo yaqaan "difaaca wadajirka ah." Jadeecada, 95% dadka waa in la tallaalaa si loo helo difaaca wadajirka ah. Dugsiyada ay ku badan yihiin carruurta aan la tallaalin waxay u badan tahay inay ka dhacaan dillaaca cudurrada. Dillaaca cudurku wuxuu khatar gelinayaa dhammaan carruurta – oo ay ku jiraan – carruurta la tallaalay.

2. Carruurta aan tallaallada qaadan karin sababo caafimaad awgood, (sida kuwa qaadanaya daaweynta kansarka), waxay si wanaagsan uga badbaadsan yihiin cudurrada. Carruurtani waxay halis weyn ugu jiraan inay qaadaan cudurrada oo ay si daran u xanuunsadaan.
Waxay ku tiirsan yihiin in dadka kale la tallaalo si looga caawiyo joojinta faafitaanka cudurrada loogana ilaaliyo xanuunnada. Sidaas awgeed, dadka daryeela carruurtan waxay dooran karaan oo keliya xarun heerka tallaalku uu ku filan tahay ilaalinta ilmahooda.

Waa sidee Heerarka Tallaalka ee Colorado?

Cudurka	Celceliska Heerka Tallaalka ee Carruurta Xannaanada Carruurta ee Colorado
Jadeeco	87.7%
Diphtheria, teetanada, iyo qufac-dheer (DTaP)	86.9%
Bakteeriyada curyaamisa (Polio)	87.3%
Bus-buska (Varicella)	86.7%

Colorado waxaa dhawaan ka dhacay dillaacyo jadeeco iyo xiiqdheer ah, taas oo qayb ahaan ay sabab u tahay in heerarka tallaalku aanay ku filnayn xakamaynta faafitaanka cudurrada. Eeg heerarka tallaalka ee Colorado: **cdphe.colorado.gov/immunization/school-and-child-care-data**

Ma jiraan ka-reebitaanno laga sameeyo shuruudaha tallaallada?

Gobolladu waxay waalidiinta u oggol yihiin inay carruurtooda ka dhaafaan tallaallada, isla markaana ay carruurtu sii dhigtaan dugsiga ama xannaanada carruurta. Si kastaba ha ahaatee, gobollo badan, oo ay ku jirto Colorado, waxay waajib ka dhigaan in carruurta aan la tallaalin ay guriga joogaan haddii dugsigooda uu ka dillaaco cudur. Dhammaan gobolladu waxay oggol yihiin ka-reebitaanka tallaallada sababo caafimaad awgood. Gobollada qaarkood waxay sidoo kale oggol yihiin ka-reebitaanka tallaallada sababo la xiriira caqiidada qofka iyo/ama sababo caqiido diimeed. Xusuusnow: Cudurrada aan tallaallada uga hortagno waa kuwo dhab ah, qaar badanna waxay halis u keeni karaan nolosha. Doorashada in aan ilmaha la tallaalin waxay ilmaha u keeni kartaa khatar uu cudurka ku qaado oo uu dadka kale u gudbiyo.

Gunaanadka

Marka heerarka tallaalku hoos u dhacaan, khatarta dillaaca cudurradu way korodhaa. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay in la hubiyo in dhammaan carruurta qaadan kara tallaalka ay qaataan. Marka aad ilmahaaga tallaasho, waxaad sidoo kale cudurrada ka ilaalinaysaa ardayda ay isku fasalka yihiin, macallimiinta iyo xubnaha bulshada. Tallaalka U Qaado Si Wanaagsan!

IMMUNIZE COLORADO

IMMUNIZE FOR GOOD